Macluumaadka ka qaybqaataha

# Nooca 1-aad ee sonkorowga (T1D) khatarta uu ku leeyahay dadka waaweyn

- T1DRA waa **daraasaddii ugu horreysay ee dadwayne ee UK** oo ujeeddadeedu tahay in lagu aqoonsado **dadka waaweyn ee da'doodu u dhaxayso 18-70** Khatarta mustaqbalka ee inuu ku dhaco nooca 1aad ee sonkorowga.
- Qof kasta oo ka qayb qaadanayaa wuxuu naga caawinayaa inaan wax badan ka fahanno dariiqyada inoo horseedaya aqoonsiga cudurka sonkorowga nooca 1aad ee dadka waaweyn.
- Iyada oo la isticmaalaayo **baaritaanka dhiigga farta laga qaado ee guriga,** waxaan kuu sheegi doonaa haddii aad leedahay calaamadaha cadeeynaya Khatarta korodhay ee nooca 1-aad ee sonkorowga iyadoo la baarayo in dhiigaadu leeyahay ama xambaarsanyahay borotiinnada loo yaqaanno borotiinada difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga (islet autoantibodies).
- Waxaan ku dhiirigelinaynaa dadka ka soo kala jeeda asal kasta iyo isir kasta inay ka qayb qaataan T1DRA si natiijooyinkayagu ay si sax ah u matalaan dadka qaangaarka ah ee UK.
- Ka qaybgalka gebi ahaanba waa mutadawacnimo ama ikhtiyaari.
- Fadlan na weydii haddii aay jiraan wax aan la fahmi karin ama aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah.

Waad ku mahadsan tahay inaad tixgelisay ka qaybqaadashada mashruucan cilmi-baarista.

## Waa maxay Nooca 1aad ee Sonkorowga?

- Nooca 1-aad ee Sonkorowg waa xaalad uu hab-dhiska difaaca jidhku si khalad ah u weeraro oo uu u burburiyo unugyada jidhka ee caafimaadka qaba.  Hab-dhiska difaaca jirka ee loogu talo galay in uu inagaga badbaadiyo caabuqyada sida fayrasyada iyo bakteeriyada ayaa si qalad ah u weerara oo u baabi'iya unugyada beta ee ku jira beeryaraheena kaas oo soo saara insulin-ka.

- Dhammaanteen waxaan u baahanahay insulin-ka si aan u noolaano.  Waxay qabataa shaqo lagama maarmaan ah.  Waxay u oggolaaneysaa in gulukooska dhiiggeena ku jiraa uu soo galo unugeenna oo jirkeena siiyo tamar.

- Tijaabooyin ama Baaritaano lagu sameeyay shaybaaradayada ayaa lagu ogaani karaa muunad yar oo dhiig ah in borotiinada loo yaqaanno islet autoantibodies ay ku jiraan. Hadday sidaas tahay, tani waxay la macno noqon kartaa in unugyada soo saaraya insulinta ay dhaawacmaan.

- Islet autoantibodies waxaa laga heli karaa dhiigga sanado badan ka hor inta uusan qofka ku dhicin nooca 1aad ee sonkorowga.

## Waa maxay ujeedada laga leeyahay daraasadda T1DRA?

- Daraasado hore oo la sameeyay ayaa muujiyay in 3 ka mid ah 1000kii **carruur** ah (0.3%) ay leeyihiin laba ama in ka badan oo ah unugyada difaaca jirka ee islet-ka kaas oo kujiro dhiigooda. In ka badan 80% kuwan ayaa ku dhaca nooca 1-aad ee sonkorowga marka ay gaaraan da'da 20 sano.

- Hadafkayagu ugu wayn waa in aan ogaano inta qof ee **qaangaarka** ah ee ku nool Boqortooyada Midowday (UK) ee khatarta ugu jira inay qaadaan nooca 1aad ee sonkorowga ka hor intaanay noqonin kuwa xanuun qawo ama jiran.

- Dadka lagu helo inay halis aad u weyn ku jiraan waa la taageeri doonaa waxaana la siin doonaa talada ugu wanaagsan ee kaga gudbi karaan khatarta hadda jirta, waxaana lagu samayni doonaa baaritaano dabagal oo joogto ah waxaana la siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daraasado dabagalka ah.

## Yaa xaq u leh inuu ka qayb qaato?


- Dadka ku nool UK ee da'doodu u dhaxayso 18 ilaa 70 sanno ee **AAN LAGA** baarin cudurka sonkorowga ee nooca 1aad.

- Dadka **aan** qaadanaynin daawooyinka hoos u dhigaya awoodda dhiigaaga inuu xinjiroobo ama uu noqdo mid difaac la'an ah.

## Maxay ka qayb qaadashada ku lug leedahay?

- Markaad akhrido macluumaadkan, haddii aad jeclaan lahayd inaad ka qayb qaadato Daraasadda T1DRA, waxaad iska qori kartaa boggayaga internetka oo waxaad buuxin kartaa qaar ka mid ah su'aalaha oggolaanshaha si aad u hubiso fahamkaaga daraasadda.

- Waxaan u baahanahay macluumaadkaaga xiriirka iyo macluumaadka sida da'daada, jinsigaaga aad ku dhalatay, qowmiyadda, xaalad kasta oo caafimaad oo khuseeya. Waxaan sidoo kale wax ka weydiin doonaa taariikh kasta oo qoyska ah ee nooca 1aad ee sonkorowga.




## Baaritaanka dhiigga ee xididka farta laga qaado

Marka la helo oggolaanshahaaga, waxaanu kuugu soo diri doonaa boostada bacda lagu qaado dhiiga farta laga qaad oo la socod cinwaanka boostada gurigaaga oo leh tilmaamo buuxa oo aanu ku soo celino baakadaha boostada bilaashka ah.



Dhowr dhibcood oo dhiig ah ayaa farta laga qaadaa waxaana lagu shubaa tuubo yar iyada oo la isticmaalaayo ama aan la isticmaalaynin tuubada qaadista.

- Muunadan waxa lagu soo qaadaa guriga waxaana lagu soo celiyaa iyada oo la isticmalaayo sanduuqa boostada caadiga ah.
- Muqaalka fidiyoowga hagitaanka iyo tilmaamooyin qoran oo cad ayaa la bixiyaa.

## Sideen ku ogaan karaa natiijada shaybaar kasta oo aan bixiyo?

**Calamadeeyaha borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga**

- Tijaabada shaybaadhka joogtada ahi waxay caadi ahaan qaadataa siddeed ilaa toban toddobaad si loo dhamaystiro waxyaabaha markaas loo baahanyahay.
- Dadka aan lahayn calamadeeyaha borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga (tijaada taban) waxay natiijadooda ku heli doonaan fariin qoraal ah (SMS).
- Dadka leh hal ama in ka badan oo borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga (tijaabo togan) ayaa la waydiin doonaa inay si ikhtiyaari ah ugu celiyaan muunad dhiiga farta laga baaro si loo xaqiijiyo natiijada. Tani waa nidaamka caadiga ah ee cilmi-baaristayada maaddaama heerarka borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga ay isbedbeddeli karaan, gaar ahaan haddii heerarku hooseeyo.
- Dadka loo xaqiijiyo inay qabaan hal ama in ka badan oo ah borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga waxaa laso xidhiidhi doono kalkaalisada daraasadda waxayna natiijadooda ku heli doonaan hab iimayl/warqad ah.

## Calamadeeyaha borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga iyo dabagalka T1DRA ee sannadlaha ah.

### Ma jiro calamadeeyaha borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga:

Borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga waa mid taban

Hadii aan heli weeyno borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga taani waa natiijo taban.

Natiijada taban ee lagu helo fariin qoraalka (ayaa ah in dabagal dheeraad ah aan loo baahnayn)

Tijaabiada natiijada taban ee borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga **macnaheedu maaha in waligaa uusan ku dhacaynin nooca 1-aad ee sonkorowga,** laakiin fursadaha uu kuugu dhici karo ayaa aad uga hooseeya natiijada togan.

## Hal calamadeeyaha borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga ah:

Hal calamadeeyaha borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga ah oo togan

↓

Natiijada togan ee halka borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga ah ayaa lagu xaqiijiyaa muunooyin dhiig ah oo kala duwan.

↓

Muunadooyinka asaasiga ah: Dhecaanka DNA-da afka laga qaado

↓

Dabagalka sannadlaha ah - Muunadda dhiigga ee farta laga qaado

Hadii aan helno **hal** borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga ah, taasi waa natiiijo togan.

In lagaa helo natiijada togan ee halka borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga ah **macnaheedu maaha inaad sii wadi doonto inaad sii qabto nooca 1aad ee sonkorowga,** laakiin waxaad ugu jirta halis marka la barbar dhigo dadka kale ee aan lahayn calaamadahan.

## Laba ama in ka badan oo ah calamadeeyaha borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga:

Dhowr borotiinka difaaca jirka ee la xiriira

↓

Natiijada togan ee dhowrka borotiinyada difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga ah ayaa lagu xaqiijiyaa muunooyin dhiig ah oo kala duwan

→ Fursad aad ugu biirto "Khatarta u ah Cudurka Sonkorowga ee sameeya difaaca jirka- ARAD" si qoto dheer loo falanqeeyo dheef-shiid kiimikaadka iyo difaaca

↓

Muunadooyinka asaasiga ah: Dhecaanka DNA-da afka laga qaado, UCPCR (kaadida) HbA1c (baaritaanka dhiiga fata laga qaado)

↓

Dabagalka sannadlaha ah - Muunadda dhiigga ee farta laga qaado, HbA1c iyo kaadida

Hadii aan helno **laba ama in ka badan** oo ah calamadeeyaha borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga oo dhiiga kujira, taasi sidokale waa natiiijo togan.

Tijaabada natiijadiisu togan yahay ee laba ama in ka badan oo ah borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga waxay la macno tahay inay u badan tahay inuu kugu dhaco T1D wakhtiga mustaqbalka, marka la barbar dhigo dadka kale ee aan lahayn calaamadahan.

## Waa maxay faa'iidooyinka suurtagalka ah ee ka qaybqaadashada?

Waxaa ku cad daraasado lagu sameeyay carruurta in (waalidkoodu) aay ogyihiin wax ku saabsan halista nooca 1-aad ee sonkorowga ay ka caawiso kahortaga in aad si xun ugu xanuunsato heerarka sonkorta dhiigga oo aad u sarreeya. Xaaladan waxa loo yaqaan sonkorowga dhiigu so saaro asidh dhiig ah oo dheeri ah (diabetic ketoacidosis (DKA) waxayna noqon kartaa xaalad caafimaad oo degdeg ah ama nafta halis gelisa.

Tijaabada T1DRA waxay ujeedadeedu tahay inay ka caawiso ka hortagga xaalada sonkorowga dhiigu so saaro asidh dhiig ah oo dheeri ah ee DKA ee dadka qaangaarka ah iyadoo la ogeysiinayo khatarta mustaqbalka ee inuu ku dhaco nooca 1aad ee sonkorowga.

## Waa maxay faa'iido darrada suurtagalka ah iyo khatarta ka qaybqaadashada?

Waxaa laga yaabaa inaad xoogaa xanuun ah ka dareento fartaada markaad isticmaalayso qalabka durmada (qalabka farta laga mudi doono) si looga qaado muunada dhiig ah xidid yarahaaaga.

Maadaama cilmi-baaristan ay ku lug leedahay daraasadda borotiinka difaaca jirka ee la xiriira sonkorowga kuwaas oo saadaalin kara inuu ku dhaco nooca 1-aad ee sonkorowga, waxaa jira khataro la xiriira. Haddii aad ogaato in aad khatar weyn ugu jirto nooca 1-aad ee xanuunka sonkorowga, tani waxa ay kaa dhigi kartaa mid dareemaaya walaac. Si loo yareeyo walwalka, marka lagu siiyo natiijo kasta oo baaritaan ah, waxaanu kuu sharxi doonaa macnahooda waxaanan ku siin doonaa dabagal sanadle ah kaas oo aan kaaga dhihayno qaab taageero oo joogto ah.

## Maxaa ku dhici doona muunado kasta oo aan bixiyo?

- Muunado kasta oo aan kaa ururinno waxa lagu kaydiyaa iyada oo la isticmaalayo kood gaar ah kaas oo kaliya dib loogu raadin karo muunada laga qaaday iyada oo la marayo xog sugan oo habaysan taas oo xaddidan.
- Muunadooyinka waxa loo isticmaali doona cilmi-baadhis lagu sameeynaayo nooca 1-aad ee xanuunka sonkorowga iyo xaaladaha difaaca jidhka ee la xidhiidha.
- Muundooyinka qaarkood ee aanu ururinno waxa loo diri doonaa isaga oo qarsoni ah oo cid walbo fahmi karin oo qarsoodi ah shaybaarrada cilmi-baarista qaranka iyo kuwa caalamiga ah si hab dheeraa ah loogu cabbiro ama tijaabin dheeraad ah loo marsiiyo. Natiijooyin kasta iyo waraaqo kasta ayaa la samayn doonaa iyadoo la isticmaalayo koodkan waxaana la raacayaa tilmaamaha adag ee ilaalinta xogta.
- Muunadooyinka waa la hayn doonaa muddo dheer si ay noogu oggolaadaan inaan dib u isticmaalno mustaqbalka haddii farsamooyin cusub/su'aalo cilmi-baaris aay dib ka yimadaan.
- Haddii aad rabto inaad sidaas samayso, waxaad codsan kartaa in muunadooyinkaaga la baabi'iyo wakhti kasta.

## Maxaa dhacaya haddii aan beddelo qorshahayga?

Waad ka bixi kartaa wakhti kasta, uma baahnid inaad sheegto sababta ka noqoshada. Haddii aad ka baxdo, xog kasta oo horeba looga so helay muunada waa la hayn doonaa.

## Sidee macluumaadkayga loogu ilaalin doonaa si qarsoodi ah?

- Dhammaan macluumaadka la ururiyo ee adiga kugu saabsan inta daraasaddu socoto waxaa si adag lagu hayn doonaa iyadoo la raacayo macluumaadka Xeerka Ilaalinta Xogta Guud GDPR ee hoose.
- Macluumaad kasta oo ka baxa xarunta isku xirka waxaa laga saarayaa magacaaga iyo cinwaankaaga si aan lagaaga aqoonsanin.

## Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (GDPR)

Jaamacadda Bristol ayaa kafaala qaaday daraasaddan oo fadhigeedu yahay magaalada Bristol ee dalka Ingiriiska. Waxaan u isticmaali doonaa macluumaadkaaga si aan u qaadno daraasaddan waxuuna u shaqayn doonaa sidii maamulaha xogta daraasaddan. Tani waxay ka dhigan tahay inaan mas'uul ka nahay inaan ilaalino macluumaadkaaga oo aan u isticmaalno si sax ah. Jaamacadda Bristol waxay hayn doontaa macluumaadka la aqoonsani karo ee adiga kugu saabsan 15 sano ka dib marka daraasaddu dhammaato.

Xuquuqdaada helitaanka, bedelida ama wareejinta macluumaadkaaga waa xadidan tahay, maadaama aan u baahanahay inaan u maareyno macluumaadkaaga siyaabo gaar ah si cilmi baaristu u noqoto mid la isku halayn karo oo sax ah. Haddii aad ka baxdo daraasadda, waxaanu hayn doonaa macluumaadka adiga kugu saabsan ee aan hore u helnay. Si loo ilaaliyo xuquuqdaada, waxaanu isticmaali doonaa macluumaadka shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo ee ugu yar ee suurtogalka ah.

Dadka kaliya ee qaybta ka ah Jaamacadda Bristol ee heli doona macluumaadka adiga laguugu aqoonsani karo ayaa ah dadka u baahan inay kula soo xidhiidhaan si ay u bixiyaan ama kuu siiyaan xogta cusub ee daraasada ama u kormeeraan habka xog ururinta. Dadka falanqeeyaa macluumaadka ma awoodi doonaan inay ku aqoonsadaan oo ma awoodi doonaan inay ogaadaan magacaaga ama macluumaadkaaga xiriirka.

## Maxaa ku dhici doona natiijooyinka daraasadda cilmi-baarista?

Natiijooyinka ka soo baxa cilmi-baarista T1DRA waxaa lagu daabici doonaa mareegahayaga iyo joornaalada sayniska ee asaagii dib loo eegay. Warbixin kasta ama bandhigyo ku saabsan daraasadda waxaa loo qori doonaa si aan qofna u aqoonsan karin qof kasta oo ka qaybqaatay.

## Maxaa dhacaya haddii ay dhibaato jirto?

Aad bay u adag tahay waana wax aan dhici karin in wax khaldamaan. Haddii ka qaybqaadashada mashruucan cilmi-baadhistu ay ku waxyeellayso, ma jiraan qabanqaabo magdhow oo gaar ah. Haddii waxyeelo kuso gaadho dayacaad ka yimid shaqsi awgeed, markaas waxa laga yaabaa inaad cudurdaar u yeelato dacwad sharci ah, laakiin waxa laga yaabaa inaad bixiso kharashyadaada sharci. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad rabto inaad ka cabato, ama aad wax welwel ah ka qabto dhinac kasta oo ku saabsan habka laguula soo xiriiray ama laguula dhaqmay intii lagu jiray daraasaddan fadlan nala soo xiriir adoo isticmaalaya faahfaahinta lagu bixiyay dhammaadka xaashidan macluumaadka.

## Yaa abaabulaya oo maalgelinaaya T1DRA?

T1DRA waxaa taageera Helmsley Charitable Trust laakiin ururo kale ayaa maalgeliyay qaybo kala duwan oo shaqada ah. Ma jiraan dano ganacsi oo daraasaddan ku lug leh.

## Yaa dib u eegay daraasadda?

T1DRA waxaa dib u eegay oo ansixisay Maamulka Cilmi-baarista Caafimaadka ee NHS (lambarka tixraaca 23/NW/0305).

## Yaan la hadlaa haddii aan wax su'aalo ah ama walaac ah qabo?

Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad waydiiso dhammaan su'aalaha maskaxdaada ku soo dhaca ee ku saabsan daraasadda. Waxaad nala soo xiriiri kartaa adigoo isticmaalaya faahfaahinta hoose.

## NALA SOO XIRIIR:


Baaraha sare waa Barafasoor Kathleen Gillespie PhD

**Iimaylka Kooxda Daraasadda:** t1dra-study@bristol.ac.uk

**Mareegta:** bristol.ac.uk/translational-health-sciences/t1dra

**Ciwaanka Boostada:** Sonkorowga iyo dheef-shiid kiimikaadka, Barashada iyo Cilmi-baarista, Isbitaalka Southmead, Wadada Southmead BS10 5NB.


**Waad ku mahadsan tahay mar labaad akhrinta macluumaadkan iyo wakhtiga aad ku bixisay ka qayb qaadashada.**